oon shakiyin, kuna Jahaada Xoolahooda iyo naftooda jidka Eebe dartiis, kuwaasi waa kuwa runlowga ah.

ثُمَّ لَمْ يَرْتَابُوا۟ وَجَٰهَدُوا۟ بِأَمْوَٰلِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ
فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلصَّٰدِقُونَ ١٥

16. Waxaad dhahdaa ma Eebbaad usheegeysaan diintiinna isagoo og waxa Samaawaadka iyo Dhulkaba ku sugan, Eebana wax walba waa ogyahay.

قُلْ أَتُعَلِّمُونَ ٱللَّهَ بِدِينِكُمْ وَٱللَّهُ
يَعْلَمُ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۚ
وَٱللَّهُ بِكُلِّ شَىْءٍ عَلِيمٌ ١٦

17. Waxay kugu mannaysan inay Islaameen, waxaad dhahdaa haygu mannaysanina Islaamkiinna Eebaa manna idinku leh inuu idinku hanuuniyay Iimaanka haddaad run sheegeysaan.

يَمُنُّونَ عَلَيْكَ أَنْ أَسْلَمُوا۟ ۖ قُل لَّا تَمُنُّوا۟ عَلَىَّ إِسْلَٰمَكُم ۖ
بَلِ ٱللَّهُ يَمُنُّ عَلَيْكُمْ أَنْ هَدَىٰكُمْ لِلْإِيمَٰنِ إِن كُنتُمْ
صَٰدِقِينَ ١٧

18. Eebe waa ogyahay waxa Samaawaadka ku maqan iyo dhulkaba, Eebana waa arkaa waxaad camal falaysaan.

إِنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ غَيْبَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَٱللَّهُ
بَصِيرٌۢ بِمَا تَعْمَلُونَ ١٨

Xaq rumaynta iyo Eebe aqoontu ma aha wax Ruux walba iska sheegan, ee waxay u baahantahay camal fal iyo Iimaan dhab ah, waana inaan la noqonin kuwo daahirka ka muslin ah hoostana aan Iimaanku qalbigooda galin, sida kuwa Aayaddu sheegeyso. Mu'minka runta ah waa ka Xaqa si dhab ah u rumeeyay shakina galin, Xoolihiisa iyo Naftiisana Jidka Eebe ugu Jihaada, cid walbana Eebe waa ogyahay wuxuu yahay umana baahna in looga warramo, illeen isagaa wax walba oge, Islaamnimadana cidna ha ku mannaysan adaaba Eebe kuu sama falaye markuu kugu hanuuniyay Jidka toosan, isagaana manno kugu leh. Siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) Ansaareey miyaanan idin helin idinkoo baadi ah oo Eebe igu kiin hanuuniyay iyo idinkoo kala tagsan oo Eebe igu kiin kulmiyay, ood caydh ahaydeen oo Eebe igu kiin hodmiyay, markuu hadal dhahaba waxay dhahayeen Eebe iyo Rasuulkiisa yaa manno leh. Al-Xujuraat (14-18).

# Suurat Qaaf سُورَةُ قٓ ٥٠

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Quraanka sharafta leh (in dadka la soo bixin).

قٓ ۚ وَٱلْقُرْءَانِ ٱلْمَجِيدِ ١

2. Waxayse La yaabeen inuu u yimid dige ka mid ah oy markaas dheheen gaaladii kan waa wax la yaab leh.

بَلْ عَجِبُوٓا۟ أَن جَآءَهُم مُّنذِرٌ مِّنْهُمْ
فَقَالَ ٱلْكَٰفِرُونَ هَٰذَا شَىْءٌ عَجِيبٌ ٢

3. Ma markaan dhimanno oon carro noqonno yaa nala soo celin, taas waa soo celin fog.

أَءِذَا مِتْنَا وَكُنَّا تُرَابًا ذَٰلِكَ رَجْعُۢ بَعِيدٌ ٣

4. Waan ognahay waxa dhulku ka cunay jidhkooda, agtannadana waxaa yaallaa Kitaab koobay wax walba,oo ilaashan.

قَدْ عَلِمْنَا مَا تَنقُصُ ٱلْأَرْضُ مِنْهُمْ ۖ وَعِندَنَا كِتَٰبٌ حَفِيظٌۢ ٤

5. Waxaybase beeniyeen xaqii markuu u yimid, waxayna ku suganyihiin xaal qasan.

بَلْ كَذَّبُوا۟ بِٱلْحَقِّ لَمَّا جَآءَهُمْ فَهُمْ فِىٓ أَمْرٍ مَّرِيجٍ ٥

6. Miyayna eegin Samada korkooda ah sidaan u dhisnay una qurxinay ayna duleella u lahayn.

أَفَلَمْ يَنظُرُوٓا۟ إِلَى ٱلسَّمَآءِ فَوْقَهُمْ كَيْفَ بَنَيْنَٰهَا وَزَيَّنَّٰهَا وَمَا لَهَا مِن فُرُوجٍ ٦

7. Dhulkana waan waasicinnay waxaana ku sugnay Buuro, waxaana ka soo bixinnay dhexdiisa nooc kasta oo quruxsan.

وَٱلْأَرْضَ مَدَدْنَٰهَا وَأَلْقَيْنَا فِيهَا رَوَٰسِىَ وَأَنۢبَتْنَا فِيهَا مِن كُلِّ زَوْجٍۭ بَهِيجٍ ٧

8. Inay aragti iyo waano u noqoto Ruux kasta oo Addoon Eebe oo toobad keen badan ah.

تَبْصِرَةً وَذِكْرَىٰ لِكُلِّ عَبْدٍ مُّنِيبٍ ٨

Suuraddani waa suurad la yaab leh oo kulmisay abuuridda Khalqiga, soo bixinta, Xisaabta, Jannada, Naarta, wanaag marinta, ciqaaabta rajo galinta iyo cabsi galintaba. Eebana wuxuu quraanka ugu dhaartay in waxa Suuraddu sheegeyso xaqyahay, Eebana wax kama cajiso, soo bixinta dadka iyo kulminta xubnohoodiina awood buu u leeyahay, maxaayeelay wax walba waa ogyahay, waana kan inoogu nimceeyay Cirka korkeenna ah ee Quruxda badan iyo Dhulka uu inoo waasiciyay ee aan ku dul noollahay wax kasta oo wanaagsanna inooga soo bixiyay, si ay waano, Eebe aqoonsi iyo toobad keen innoogu noqoto, waana arrin Eebe lugu mahadiyaa. Qaaf (1-8).

---

9. Waxaan ka soo dajinnay samada Biyo barakaysan oon ku soo bixinnay Beero iyo Midho la goosta,

وَنَزَّلْنَا مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً مُّبَٰرَكًا فَأَنۢبَتْنَا بِهِۦ جَنَّٰتٍ وَحَبَّ ٱلْحَصِيدِ ٩

10. Iyo timir dheer oo fidsan oo leh fiido wax ka soo dhashaan oo is dul saaran.

وَٱلنَّخْلَ بَاسِقَٰتٍ لَّهَا طَلْعٌ نَّضِيدٌ ١٠

11. Si Addoommada Eebe loogu irsaaqo, Biyahaana waxaan ku noolaynay Magaalo dhimatay, saasayna soo bixintu tahay.

رِّزْقًا لِّلْعِبَادِ ۖ وَأَحْيَيْنَا بِهِۦ بَلْدَةً مَّيْتًا ۚ كَذَٰلِكَ ٱلْخُرُوجُ ١١

12. Kuwa Reer Makaad hortooda waxaa xaqii beeniyay Qoomkii (Nabi) Nuux iyo Rasi dadkeedii iyo thamuud.

كَذَّبَتْ قَبْلَهُمْ قَوْمُ نُوحٍ وَأَصْحَٰبُ ٱلرَّسِّ وَثَمُودُ ١٢

13. Iyo Ree Caad iyo Fircoon iyo (Nabi) Luudh walaalihiis (qoomkiisii).

وَعَادٌ وَفِرْعَوْنُ وَإِخْوَانُ لُوطٍ ﴿١٣﴾

14. Iyo kayntii dadkeedii (Nabi Shucayb qoomkiisii) iyo Qoomkii Tubbac, dhammaantood waxay beeniyeen Rasuulladdi, waxaana ku dhacay wixii Eebe ugu goodiyay (ciqaabtii).

وَأَصْحَٰبُ ٱلْأَيْكَةِ وَقَوْمُ تُبَّعٍ كُلٌّ كَذَّبَ ٱلرُّسُلَ فَحَقَّ وَعِيدِ ﴿١٤﴾

15. Ma waxaan ka noognay abuuriddii hore, waxayse shakisan yihiin abuuridda cusub (soo bixinta).

أَفَعَيِينَا بِٱلْخَلْقِ ٱلْأَوَّلِ بَلْ هُمْ فِى لَبْسٍ
مِّنْ خَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٥﴾

**Ilaaheen Nicmadiisu waa badantahay, waxaana ka mid ah Roobka uu ku soo bixiyo Cunnada kala duwan, si khalqiga Eebe ugu noolaadaan, una nooleeyo Magaalo abaarowday oo dhimatay, si ay daliil ugu noqoto dadka soobixinta Qiyaame, maxaayeelay kama darra abuuriddii hore siduu Eebe ku yidhi hadalkiisa Qudsiga ah, « waxay dhihi banii-aadamku iima soo celinayo Eebe siduu igu billaabay' Abuurka horana iigama fududa soo celinta». Xaqdiidayaashu ma aha wax cusub iyo wax ku gaar ah kuwii Nabiga beeniyay, ee waxaa Nabiyadoodii iyo Rasuulladoodii beeniyay gaalo badan oo hore, waxaase ku dhacday halaag, waxaana dhulkii u hadhay xaqii Eebe ee Nabiyadu u yeedhayeen. Qaaf (9-15).**

---

16. Dhab ahaan yaan u abuurray Insaanka (dadka) waana ognahay waxay naftiisu ku waswaasin Annagaana uga dhaw xididka dhuunta.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا ٱلْإِنسَٰنَ وَنَعْلَمُ مَا تُوَسْوِسُ بِهِۦ نَفْسُهُۥ
وَنَحْنُ أَقْرَبُ إِلَيْهِ مِنْ حَبْلِ ٱلْوَرِيدِ ﴿١٦﴾

17. Markay kulmi malaa'igta ilaalinaysa oo Midigta iyo bidixda ka fadhida.

إِذْ يَتَلَقَّى ٱلْمُتَلَقِّيَانِ عَنِ ٱلْيَمِينِ وَعَنِ ٱلشِّمَالِ قَعِيدٌ ﴿١٧﴾

18. Wax kastoo lugu hadlo waxaa la jooga Raqiib iyo Catiid (oo qori).

مَّا يَلْفِظُ مِن قَوْلٍ إِلَّا لَدَيْهِ رَقِيبٌ عَتِيدٌ ﴿١٨﴾

19. Waxaa u yimid sakaraadkii geerida si dhab ah wanataas geeridaad ka cararaysay.

وَجَآءَتْ سَكْرَةُ ٱلْمَوْتِ بِٱلْحَقِّ ذَٰلِكَ
مَا كُنتَ مِنْهُ تَحِيدُ ﴿١٩﴾

20. Suurkii (Qiyaamana) waa la afuufi waana Maalin laysu yaboohay (oo sugan).

وَنُفِخَ فِى ٱلصُّورِ ذَٰلِكَ يَوْمُ ٱلْوَعِيدِ ﴿٢٠﴾

21. Naf walba way iman iyadoo malag hoggaamin midna ku marag furi.

وَجَآءَتْ كُلُّ نَفْسٍ مَّعَهَا سَآئِقٌ وَشَهِيدٌ ﴿٢١﴾

22. Waxaana loo odhan waad halmaansanaydeen ariintan (Qiyaamada) waxaana kaafaydnay daboolkii araggaaguna Maanta waa xoog badan yahay.

لَّقَدْ كُنتَ فِى غَفْلَةٍ مِّنْ هَٰذَا فَكَشَفْنَا عَنكَ غِطَآءَكَ
فَبَصَرُكَ ٱلْيَوْمَ حَدِيدٌ ﴿٢٢﴾

23. Malaggii la xidhiidhayna wuxuu dhihi waa kan waana darbanyahay, (kii layxilsaaray).

وَقَالَ قَرِينُهُۥ هَٰذَا مَا لَدَىَّ عَتِيدٌ ﴿٢٣﴾

24. Markaasaa lugu dhihi ku tuura Naarta Jahannamo Gaalnimo badane madax adag dhammaantiis.

أَلْقِيَا فِي جَهَنَّمَ كُلَّ كَفَّارٍ عَنِيدٍ ﴿٢٤﴾

25. Oo khayrka reebidbadan gardarraaloowna ah shakiilowna ah.

مَّنَّاعٍ لِّلْخَيْرِ مُعْتَدٍ مُّرِيبٍ ﴿٢٥﴾

26. Ee Eebe miciisa Ilaah kale yeelay, ku tuura caddibaad daran.

ٱلَّذِى جَعَلَ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ فَأَلْقِيَاهُ فِى ٱلْعَذَابِ ٱلشَّدِيدِ ﴿٢٦﴾

Dadka Eebaa abuuray, Malaa’igna wuu u diray wax kastoo la camal-falana way qoraysaa Eebana waa ogyahay, Dadkana waxaa ka dambeeya sakaraadka Geerida, Suurka Qiyaamaha iyo xisaab, saa darteed waa in loo darbadaa siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee): Seed u raaxaysan isagoo malaggii suurka Afka uu saaray Wajigana uu leexiyay uuna sugi in la idmo, markaasay dheheen Rasuulkii Eebow seen dhahnaa, markaasuu yidhi dhaha: Eebaa kaafiyahannaga ah Wakiilna isagaa u wanaagsan. Qaaf (16-26).

---

27. Saaxiibkiisii (shaydaankiisii) wuxuu dhihi Eeboow anigu ma dhuminnin laakiin isagaaa baadi fog ku sugnaa.

۞ قَالَ قَرِينُهُۥ رَبَّنَا مَآ أَطْغَيْتُهُۥ وَلَٰكِن كَانَ فِى ضَلَٰلٍۭ بَعِيدٍ ﴿٢٧﴾

28. Eebe wuxuu dhihi ha ku murmina agtayda waan idiin hormariyay gooddigii.

قَالَ لَا تَخْتَصِمُوا۟ لَدَىَّ وَقَدْ قَدَّمْتُ إِلَيْكُم بِٱلْوَعِيدِ ﴿٢٨﴾

29. Hadalla agtayda laguma baddalo, mana dulmiyo addoomada.

مَا يُبَدَّلُ ٱلْقَوْلُ لَدَىَّ وَمَآ أَنَا۠ بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ ﴿٢٩﴾

30. Xusuusta Maalinta u dhahayno Naarta Jahannama Ma buuxsantay, oo markaa ay dhihi wax ma la ii siyaadin.

يَوْمَ نَقُولُ لِجَهَنَّمَ هَلِ ٱمْتَلَأْتِ وَتَقُولُ هَلْ مِن مَّزِيدٍ ﴿٣٠﴾

31. Jannadiina loo soo dhaweeyo kuwii dhawrsaday iyadoon ka fogayn.

وَأُزْلِفَتِ ٱلْجَنَّةُ لِلْمُتَّقِينَ غَيْرَ بَعِيدٍ ﴿٣١﴾

32. Waxaasina waa wixii loo yaboohay Ruux kasta oo tawbadkeen badan oo dhawrid badan (ballaanka).

هَٰذَا مَا تُوعَدُونَ لِكُلِّ أَوَّابٍ حَفِيظٍ ﴿٣٢﴾

33. Ruuxii Eebaha Raxmaan ah ka yaaba isagoon arkaynin, oo la yimaada Qalbi toobadkeen badan.

مَّنْ خَشِىَ ٱلرَّحْمَٰنَ بِٱلْغَيْبِ وَجَآءَ بِقَلْبٍ مُّنِيبٍ ﴿٣٣﴾

34. Waxaa lugu dhihi ku gala Jannada Nabadgalyo waana Maalintii waariddee.

ٱدْخُلُوهَا بِسَلَٰمٍ ذَٰلِكَ يَوْمُ ٱلْخُلُودِ ﴿٣٤﴾

35. Jannada waxay ka heliwaxay doonaan, agtannadana waxaa ah siyaado.

لَهُم مَّا يَشَآءُونَ فِيهَا وَلَدَيْنَا مَزِيدٌ ﴿٣٥﴾

36. Imisa Qarniyaan halaagnay Reer Makaad ka hor oo kana xoogbadan iyagoo dhulka ku gagaddoomay, meel Eebe looga cararana ma jirto.

وَكَمْ أَهْلَكْنَا قَبْلَهُم مِّن قَرْنٍ هُمْ أَشَدُّ مِنْهُم بَطْشًا
فَنَقَّبُوا فِي الْبِلَادِ هَلْ مِن مَّحِيصٍ ٣٦

37. Waxaasina waa waanada ruuxii qalbi leh ama wax dhagaysan isagoo Qalbigiisu joogo.

إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَذِكْرَىٰ لِمَن كَانَ لَهُ قَلْبٌ أَوْ أَلْقَى
السَّمْعَ وَهُوَ شَهِيدٌ ٣٧

Saaxiibka xun wuu ku luggooyn, wuuna ku dhumin, marka dhib kugu dhacana wuu kaa tagi kaana carari sida shaydaanka, Eebana wax walba waa ogyahay muranna agtiisa ma yaallo, maxaayeelay horuuba wax walba u caddeeyay cidnana ma dulmiyo, Naarta Jahannamana (Eebe ha naga koriyee) waxay codsan in loo kordhiyo ehelkeeda, Jannadana waxaa loo soo dhaweyn kuwii Eebohood dhabnimo uga yaabay'xumaantana ka dhawrsaday, Ruuxii Eebe oqoon ah'toobadna keena waxaa lagu abaal marin Janno wax walba uu ka heli. ee waa in lagu waana qaato ummadihii hore iyo waxay ku dambeeyeen, xumaantana laga fogaado illeen Eebe wax ka fakan kara ma jiree. Qaaf (27-37).

---

38. Dhabahaan annagaa Samaawaad-ka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya ku abuurray lix maalmood, wax daal ahna nama taabanin.

وَلَقَدْ خَلَقْنَا السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا
فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ وَمَا مَسَّنَا مِن لُّغُوبٍ ٣٨

39. Ku samir (Nabiyow) waxay shee-gayaan, Eebana u tasbiixso adigoo ku mahadin qorrax soo bax ka hor iyo dhicidda ka hor.

فَاصْبِرْ عَلَىٰ مَا يَقُولُونَ وَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ
قَبْلَ طُلُوعِ الشَّمْسِ وَقَبْلَ الْغُرُوبِ ٣٩

40. Habeenkana qaar u tasbiixso iyo sujuudda dabadeed.

وَمِنَ اللَّيْلِ فَسَبِّحْهُ وَأَدْبَارَ السُّجُودِ ٤٠

41. Dhagayso Maalinta uu ka dha-waaqi mid dhawaaqa meel dhaw.

وَاسْتَمِعْ يَوْمَ يُنَادِ الْمُنَادِ مِن مَّكَانٍ قَرِيبٍ ٤١

42. Waa ay maqli qaylada oo dhab ah, waana Maalinta soo bixidda.

يَوْمَ يَسْمَعُونَ الصَّيْحَةَ بِالْحَقِّ ذَٰلِكَ يَوْمُ الْخُرُوجِ ٤٢

43. Annagaa waxna noolaynna waxna dilla, xaggannagaana loo soo ahaan.

إِنَّا نَحْنُ نُحْيِي وَنُمِيتُ وَإِلَيْنَا الْمَصِيرُ ٤٣

44. Maalinta Dhulku ka dillaaci iya-goo dagdagi,taasina waa soo kulmin noo fudud.

يَوْمَ تَشَقَّقُ الْأَرْضُ عَنْهُمْ سِرَاعًا ذَٰلِكَ
حَشْرٌ عَلَيْنَا يَسِيرٌ ٤٤

45. Annagaa og waxay dhihi, aduguna matihid mid xoogi korkooda, ee ku waani Quraanka Ruuxii Eebe waciidkiisa (goodigiisa) ka yaabi.

نَّحْنُ أَعْلَمُ بِمَا يَقُولُونَ وَمَا أَنتَ عَلَيْهِم بِجَبَّارٍ
فَذَكِّرْ بِالْقُرْآنِ مَن يَخَافُ وَعِيدِ ٤٥

Cirka iyo dhulka iyo waxa khalqi ah ee ku dhexnoolba Eebaa abuuray, wax daaliyana ma jiro, waxaase loo baahanyahay ku xidhnida Eebe adkaysi iyo cibaadadiisa oo la badiyo habeen iyo dharaarba, maxaayeelay waxaa imaan maalin dadka la kulmin oo qayla daran ka kor dhawaaqi, Qubuurahana ay si dagdag ah uga soo bixi, Nabiguna wuxuu yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee): Anaa ugu horrayn Ruux dhulku ka dillaaco). waxaa wariyay Muslim.
Eebaana wax nooleeya waxna dila, dadkuna isagay u ahaan'wax walbana waa u fududyahay, waase indadka la waaniyo si quruxsanna wax loogu sheego, illeen xoog wax kuma hanuunee, hallawna wax ma taree. Qaaf (38-45).